Thamuud

ثمود

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد

Nabi صالح عليه السلام Saalix Calayhissalaamu iyo ثمود Thamuud

Nabi Saalix waxaa loo diray dadka Carabta ah oo ka farcamay muslimiintii reer **عاد Caad** oo la yiraahdo **ثمود Thamuud**, degi jirayna **الحجر Al Xijru**, oo Al Madiinah Al Munawwarah waqooyigeeda ku taallaa, una jirta ilaa afar boqol kiiloomitir.

Reer Thamuud Ilaahay ayay ku gaaloobeen, arliga dhexdiisana fasaad ka sameeyeen. Markaasuu Ilaahay wuxuu u diray **صالح بن عبيد بن أسف بن ماسخ بن عبيد بن خادر بن ثمود بن جاذر بن إرم بن سام بن نوح** Saalix bin Cubayd bin Asaf bin Maasikh bin Cubayd bin Khaadir bin Thamuud bin Jaathir bin Iram bin Saam bin Nuux. Reer Thamuud waxay lahaayeen oo uu Ilaahay siiyay cumri dheer oo ay sidaas buuraha guryo uga qorteen ayagoo guryahay dhistaan ayagoo weli nool intay bololaan dumaan. Waxayna caabudi jireen asnaam. Ibnu Kathiir wuxuu yiri: "waxay mufassiriintu isku raaceen inay reer Thamuud ay maalin ku shireen naadigooda oo uu halkaas ugu yimid Rasuulka Ilaahay Saalix, Calayhissalaamu, oo uu markaas ugu yeeray inay Ilaahay keli ah caabudaan, waana Aayadda saddex iyo toddobaatan ee Suuratu Al Acraaf:

وَإِلَى ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ قَدْ جَاءَتْكُمْ بَيِّنَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ هَذِهِ نَاقَةُ اللَّهِ لَكُمْ آيَةً فَذَرُوهَا تَأْكُلْ فِي أَرْضِ اللَّهِ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوءٍ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ (73)

“Wa ilaa Thamuuda akhaahum Saalixan qaala yaa qawmi ucbuduu Allaaha maa lakum min Ilaahin ghayruHu qad jaa’atkum bayyinatun min Rabbiukum haathihi naaqatu Allaahu lakum Aayatan fa tharuuhaa ta’kulu fii ardi Allaahi wa laa tamassuuhaa bi suu’in fa ya’khuthakum cathaabun aliimun(73)**”.**

Aayadda macneheedu waxaa weeye:

“Qabiilka Thamuud ahna waxaan u dirnay walaalkooda ayaga ka dhashay –aanse xagga diinta walaalkooda ku ahayn- Saalix, markaasuu ku yiri: “tolkeeyow, Ilaahay caabuda, mana lihidin Ilaah aan Isaga ahayne; waxaana xagga Rabbigiin idiinka timid Aayad oo ah calaamad loo jeedo: tani waa hasha Ilaahay uu idin siiyay, marka daaya cawska Ilaahay ha ka cuntee arliga Ilaahay, hana faylo goonina oo xumaan ha ku falina, oo markaas ay cathaab xanuun badan idin haleeshee(73).”

Al Baghawii wuxuu tafsiirkiisa Aayaddaan ka yiri oo kale: Thamuud waxaa loogu bixiyay biyo yaraantooda, oo al thamadu/**الثمد** waa biyaha yar.” Waa intaas warkiisu.

wuuna waaniyay, una digay, uuna amray. Markaasay waxay ku yiraahdeen: "haddaad buurtaan dhagaxa ah, oo waxay u tilmaameen buur dhgaxa ah oo meeshaas ku tiillay fartana ay ugu fiiqeen, nooga soo saartid tulud geela oo sifooyinkeedu sidaas iyo sidaas yihiin, ayna rimman tahay toban bilood oo dheer, cunuggeeduna sifooyinkaas leeyahay, waan ku rumaynaynnaa." Markaasuu Nabi Saalix wuxuu ku yiri: "bal ka warrama haddaan idinka yeelo waxaad doonaysaan oo aan idin siiyo ma aaminaysaan waxaan

idiinla imid, mana rumaynaysaan waxaa la iigu kiin soo diray?" Waxay yiraahdeen: 'haa." Markaasuu sidaas ballan uga qaaday oo uu heshiis kula galay. Kaddib wuxu tegay musallihiisa oo ku tukan jiray oo uu Ilaahay Cazza wa Jalla u tukaday intuu u qadaray, kaddibna uu Rabbigiis Cazza wa Jalla ka baryay inuu ka yeelo oo siiyo waxay weydiisteen. Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu buurta dhagaxa amray inay soo saarto oo ay dhexdeeda kasoo baxdo hal rimman oo toban bilood xaamilo ah oo leh sifooyinkay weydiisteen. Markaasay hashaasu buurta ayago u jeeda kasoo baxday. Markay taas arkeen wuxuu la noqday amar wayn iyo xujjo caddaan ah:

هَذِهِ نَاقَةُ اللَّهِ لَكُمْ آيَةً فَذَرُوهَا تَأْكُلْ فِي أَرْضِ اللَّهِ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوءٍ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ (73)

Markaasay in badanb oo ayaga ka mid ihi islaameen, intooda badanna ay gaalnimadooda iyo baadinnimadooda kusii joogeen. Markaasuu Saalix wuxuu ku yiri: "tani waa hasha Ilaahay ee daaya ha daaqdo arliga Ilaahay, xumaanna ha u geysannina oo ay markaasi cathaab idin haleesho." Ceelkoodana maalin ayagaa ka waraabi jiray maalinna hasha oo maalinteeda biyaha ceelka oo dhan cabi jirtay, waana Aayadda boqol shan iyo konton ee Suuratu Al Shucaraa':

قَالَ هَذِهِ نَاقَةٌ لَهَا شِرْبٌ وَلَكُمْ شِرْبُ يَوْمٍ مَعْلُومٍ (155)

"Qaala: haathihi naaqatun lahaa shirbun wa lakum shirbu yawmin macluumin(155)**".**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
"Tani waa hal geela, ayaduna waxaay leedahay maalin ay ceelka ka cabto oo biyahay wax ku leedahay, adinkuna maalin la tilmaamay pp la yaqaanno ayaad biyah ceelka ka cabbaysaan

Markaasay maalintooda dhaansan jireen biyahay laba maalmood u baahan yihiin. Markaasay markay xaaladda hashaasu la dheeratay ayay madaxdoodu shireen oo goosteen inay hasha dilaan, waxaana dilay ninka la yiraahdo **قدر بن سالف بن** جندع Qadaar bin Saalif bin Jundac, ahaana nin guduudan indhihiisuna bulug yihiin timihiisuna midabka dahabka ahaayeen. Waxaana la yiri wuxuu ahaa wacal, waxaana dhalay nin la yiraahdo **سيبن** Saybaan oo hooyadiis ka dhalay ayadoo ninkeeda Saalif u dhaxda. Waxaana dilidda hasha u kacay isaga iyo sideed nin oo kale oo sagaalkoodaas ayaa Quraanka ku xusan, waxaana dilidda hasha ku dhiirri gelisay habar cajuuzo ah oo gaal ah oo la yiraahdo **عنيزة بنت غنيم بن مجلز، أم غنمة Cunayzah bintu Ghunaym bin Majliz**, koofaarteeduna tahay **Ummu Ghanmah** oo lahayd afar gabdhood oo ay dhashay ninkeeda **ذؤآب بن عمرو Thu'aab bin Camr** oo madaxdooda ka mid ahaa. Markaasay waxay Qadaar bin Saalif bin Jundac afarteeda gabdhood usoo bandhigtay inuu ka doorto tuu doono hadduu hasha dilo. Waxaa ayaduna jirta haweeney labaad oo la yiraahdo **صدوق إبنة محيى بن زهير بن المختار Saduuq ibnatu Al Maxyaa bin Zuhayr bin Al Mukhtaaru** oo laan dheer ahayd maalna lahayd, una dhaxday nin islaamay, markaasay ka tagtay. Markaasay waxay u yeertay wiil ina adeerkeed ah oo la yiraadho **مصرع بن مهرج**

Masrac bin Mahraj bin Al Maxyaa بن المحيى, ayna u sheegtay inay isi siinayso hadduu hasha dilo. Markaasaa waxaa Masrac iyo Qadaar kusoo biiray toddoba nin oo kale oo sidaasay sagaalka Quraanku sheegay ku noqdeen.
Markaasay hasha dileen. Waxaana ugu horreeyey **قدار بن سالف** Qadaar bin Saalif oo hasha faylo gooyay. Markaasay dhulka ku dhacday. Markaasay seefohooda ku boobeen oo ay googooyeen. Waana Aayadda sideed iyo afartan ee Suuratu Al Namli:

وَكَانَ فِي الْمَدِينَةِ تِسْعَةُ رَهْطٍ يُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ (48)

“Wa kaana fii al madiinati tiscatu rahdhin yufsiduuna fii al ardi wa laa yuslixuuna(48)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Magaalada Thamuudna waxaa ku sugnaa sagaal nin oo ay dhaleen madaxdoodu, arliga dhexdiisana fasaad ka wada, ahna kuwaa baadiyoobay oo xagga falidda xumaanta iyo macaasida u jeestay oo ku dhaqma, madaxna uu yahay Qadaar bin Saalif, ahna midka hasha cirbo gooyn doona, wax suubanna aan falayn(48).”

Wuxuuna Aayadda toddoba iyo toddobaatan ee Suuratu Al Acraaf ku yiri:

فَعَقَرُوا النَّاقَةَ وَعَتَوْا عَنْ أَمْرِ رَبِّهِمْ وَقَالُوا يَا صَالِحُ ائْتِنَا بِمَا تَعِدُنَا إِنْ كُنْتَ مِنَ الْمُرْسَلِينَ (77)

“Facaqaruu al nnaqata wa cataw can amri Rabbihim wa qaaluu yaa Saalixu a’itinaa bimaa tacidunaa in kunta mina al Mursaliina(77)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Markaasay hashii intay marka hore faylo gooyeen ayay hadana gawraceen, markaasay Ilaahay caasiyeen oo ay amarkiisa iskala weynaadeen uu ka siiyay hasha, Nabigoodana ay beeniyeen, waxayna ku yiraahdeen: “Saalixow, cathaabta aad naguu guulguulaysid noo keen haddaad Rusuha ka mid tahay(77).”

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu Calii bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee, intuu ku jiray duullaanka **غزوة العشيرة** Al Cushayrah ku yiri:

ألا أحدثكم بأشق الناس رجلين؟

"Alaa uxaddithukumaa bi ashqaa al nnaasi rajulayni?" oo macnihiisu yahay: "Ma idiinka warramaa labada nin oo dadka ugu ayaan daran?" Waxaan niri: "Haa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

أحيمر ثمود الذي عقر الناقة، والذي يضربك يا علي على هذه – ووضع يده على قرنه- حتى يبل منها هذه

"Uxaymiri Thamuuda allathii caqara al nnaaqata, wa allathii yadribuka yaa Caliyyu calaa haathihi -wa wadaca yadahu calaa qarnihi- **xattaa yabulla minhaa haathihi** -wa akhatha bi lixyatihi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Waa Uxaymir ee reer Thamuud, ahna midka hasha faylo gooyey, iyo midka seef kaaga dhufan doona halkaan Caliyow -wuxuuna gacantiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saaray madaxiisa- oo uu markaas dhiigga kasoo daata uu middaan qooyo", oo uu markaas Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, garkiisa qabtay." Calina sidaas uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sheegay ayaa loo dilay.

Cathaabta Thamuud

Markaasay nirigteedu carartay oo ay buur dusheeda fuusha oo ay saddex jeer qaylisay. Taas ayaa u sabab ahayd inuu Saalix dadka ku yiri: "isaga raaxaysta daarihiina saddex maalmood." Markaasuu Ilaahay sagaalkaas cathaab kusoo dejiyay oo uu dhagax cirka uga soo daadiyay laysay ka horba intaan dadkooda la cathaabin. Maalinta koowaad ee saddexda maalmood oo uu Saalix u qabtay waxay ahayd maalin khamiis ah waxay waabariisteen ayadoo wajiyadoodu hurdi yihiin. Markaasay galabtii isu sheegeen: "war hoy maalin ayaa ka gudubtay saddexda maalmood oo ajasha loo qabtay." Markaasay subaxa labaad waabariisteen, ahna maalin jimce, oo ah maalinta labaad, ayadoo ay wajiyadoodu guduudan yihiin. Markaasay markay galabtii tahay ayay waxay yiraahdeen: "war hoy ajashii waxaa ka gudbay laba maalmood." Markaasay waxay maalinta saddexaad waabariisteen, ahna maalin sabti, ayadoo ay wajiyadoodu madow yihiin. Markaasay marka galabtii noqotay waxay yiraahdeen: "war hoy ajashii waa dhammaatay." Markaasay markay ahayd subaxa axadaad ayay cathaab isu diyaariyeen ayagoo aan ogayn meeshay uga imaanayso iyo waxay tahayba.
Markaasay markay qorraxdu soo baxday ayay qaylo uga timid samada, hoostooduna dhulka la gariiray. Markaasaa wadnuhu wada go'ay oo naftu ka wada baxday, oo ay daarohoodu ku waabariisteen ayagoo wada mayd ah oo jilbo jabsan oo aan ruux lahayn.
Waana Aayadaha toddoba iyo sideed iyo lixdan ee Suuratu Huud:

وَأَخَذَ الَّذِينَ ظَلَمُوا الصَّيْحَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دِيَارِهِمْ جَاثِمِينَ (67) كَأَنْ لَمْ يَغْنَوْا فِيهَا أَلَا إِنَّ ثَمُودَ كَفَرُوا رَبَّهُمْ أَلَا بُعْدًا لِثَمُودَ (68)

“Wa akhatha allathiina thalamuu al sayxatu fa asbaxuu fii diyaarihim jaathimiina(67)ka’an lam yaghnaw fiihaa alaa inna thamuuda kafaruu Rabbahum alaa bucdan li thamuuda(68).”
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Markaasaa kuwii gaaloobay waxaa qabatay oo ku dhacday qaylo, oo Jibriil oo ku kor qayliyay hal qaylo markaasay wada dhinteen, markaasay guryohooda dhexdooda biliqsanaayeen ayagoo wada mayd ah(67)sida ayagooba aan jiri jirin oo kale oo aan adduunkaan waxba ku sugnaan oo kale. Thammuud waxaa u sugnaaday halaag iyo fogayn(68).”
Aayadda sideed iyo toddobaatan ee Suurati Al Acraafina wuxuu Tacaala ku yiri:

فَأَخَذَتْهُمُ الرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دَارِهِمْ جَاثِمِينَ (78)

“Fa akhathat-humu al rrajfatu fa asbaxuu fii daarihim jaathimiina(78)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Markaas kaddibna –waana qaylada Jibriil dabadeed- waxaa qabtay oo ku dhacay dhul gariir oo arligii ayaa la gariiray oo la dhaqdhaqaaqay, markaasay guryohooda dhexdooda iyo wadankooda dhexdiisa mayd ku wada noqdeen, ayagoo fool fool ama wajiyadooda dhulka ugu daatay ayagoo wada mayd ah.(78).”
Kamana uusan harin waxaan ahayn gabar fadhiid ah oo la oran jiray **كلبة بنت السلق، الذريعة** Kalbah bintu Al Salaq, lana yiraahdo Al Thariicah, oo gaalnimada ku fogaatay iyo colaadinta Saalix, Calayhissalaamu. Markaasay markay cathaabta aragtay ay lugeheedu u furmeen oo intay istaagtay si xoog leh u carartay. Markaasay waxay u timid qabiil Carabta ka mid oo ay u sheegtay waxa tolkeed ku dhacay, ayna weydiisatay inay biyo waraabiyaan. Markay biyaha cabtayna way dhimatay.”
Waa intaas warka ibnu Kathiir.

Zamanka Nabi Saalex

Nabi Ibraahiim Calayhissalaamu wuxuu jiray saddex kun afar boqol toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Nabi Saalex waa ka horreeyey Nabi Ibraahiim, marka Nabi Saalex wuxuu noolaa in ka badan afar kun oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.

Al Khadhiibu Al Baghdaadii/الخطيب البغدادي

Al Khadhiibu Al Baghdaadii wuxuu kitaabkiisa **قصص الأنبياء** “Qisasu Al Anbiyaa’i” ku yiri waxay ka mid yihiin:
“Thamuud waxay ku abtirsadaan **ثمود بن عاذر بن إرم بن سام بن نوح** Thamuud bin Caathir bin Iram bin Saam bin Nuux, waana aderrada **عاد بن أوس بن إرم** Caad bin Caws bin Iram. Waxayna degganaayeen **الحجر** Al Xijru oo u dhexeeya **حجاز** Xijaaz iyo **شام** Shaam ilaa **واد القرى** Waadii Al Quraa iyo hareerihiisaba.
Ilaahay Tacaalaa markuu reer Caad halaagay oo uu amarkoodu dhammaaday, Thamuud waa hartay, oo markaasuu Ilaahay Tacaalaa arliga inay cammiraan u daayay. Markaasay bateen, ayna faafeen ayna diidada amarka Ilaahay Tacaalaa ku fogaadeen, dhulkana ay fasaadiyeen, asnaamana ay caabudeen. Waxayna ahaayeen dad carab ah. Markaasuu Ilaahay Saalex u diray Rasuul ahaan…boqorkooda zamanka Saalex wuxuu ahaa **جندع بن عمر** Junduc bin Cumar isagaana Thamuud u taliyay…waana isaga ninka Saalex weydiiyay inuu buurtaas uu farta ugu fiiqay kasoo saaro hal sidaas iyo sidaas sifooyinkeedu yihiin (ayagoo Diiwaanka dhexdiisa fadhiya)…Hashaas caaneheedu reer Thamuud oo idil ayay ku filnaayeen oo cabbi jiray.”
Wuxuu kaloo yiri: “Saalex wuxuu waday oo la aaday intay la jirtay arliga **شام Shaam** (waana kaddib marka Thamuud la halligay), waxayna degeen magaalada **رملة** Ramlah (oo aan ku wada inay tahay magaalada maanta la yiraahdo **رام الله Raama Allaah** oo ku taalla daanta galbeed ee wabiga Urdun : xasanwali) ee arliga **فلسطين Falasdhiin.”**

Wuxuu kaloo yiri: “waxaa la wariyay inay Saalex iyo inta la socotay ay Makkah aadeen halaagga Thamuud kaddib, ayadana ay degeen halkaasna ku noolaayeen ilaa ay cumriyadooda ka dhammaadeen, wa Allaahu aclamu. Qabriga Saale wuxuu ku yaalla **الحجر الأسود** Xajaru Al Aswadu agtiisa.” Waa intaas warkiisu.

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “Al Khadhiibu Al Baghdaadii waa **الحافظ أبو بكر أحمد بن علي بن ثابت**al xaafith Abuu Bakr Axmad bin Calii bin Thaabit, midka kutubbada badan dhigay, imaamka wayn, imaamka xadiithka ee Shaam iyo Ciraaq, midka si la hubo u tifaftira xadiithka, caalinka u cilmi leh xadiithka midkiisa saxiixa ah iyo midka buka, kuna dheereeya xadiithka cilladihiisa iyo silsiladaha wariyaba. Wuxuu dhashay sanadka saddex boqol laba iyo sagaashan Hijriga, wuxuuna daneeyey xadiithka, gobolladuuna ugu kala safray, wuxuuna dhegeystay oo ka qaatay Abuu Al Ssalt Al Ahwaazii iyo Abaa Cumar bin Mahdii iyo khalqi badan. Isagana waxaa ka wariyay Al Barqaanii oo ka mid ah shuyuukhdiisa iyo ibnu Maakuulaa iyo khalqi badan. Wuxuu Kariimah Makkah dhexdeeda uga bartay Al bukhaarii shan maalmood, Ismaaciil Al Xiyarii-na saddex fadhi waxaana xusay oo wariyay Al Tha-habii oo yiri: “waana amar lala yaabo.” Wuxuu ku dhintay Baghdaad maalinta toddobaad ee Thuu Al Xijjah ee sanadka afar boqol saddex iyo lixdan Hijriga, waxaana lagu duugay Bishr Al Xaafii agtiisa, isagoo in halkaas iyo ninkaas agtiisa lagu duugo biyaha Zamzam u caabbay oo ku ducaystay.” Waana intaas warkiisu.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo Al Xijru wadanka Thamuud maray

Al Balaadii wuxuu yiri: "Al Xijru waa waadi ay kusoo biyo shubaan buuraha Madaa'inu Saalix, oo ah arliga Thamuud, kaddibna ku biyo shuba Waadii Al Quraa, oo uu daadkiisu maro magaalada **العلا Al Culaa**, magaalada macruufka oo la yaqaanno. **الحجر**Al Xijru waa madaxa **وادي القرى**Waadi Al Quraa, maantana waxaa dega qabiilka **عنزة**Canzah, waxaana ku yaalla beero fiican. Waxa ugu muhimsan oo halkaas ku yaallana waa waxa Thamuud ka haray oo raadkooda ah. Inta xaaraanta ah ee Al Xijri waxay qiyaas laba iyo labaatan kiiloomitir u jirtaa oo waqooyi ka xigtaa magaalada Al Culaa. Al Culaana waxay Al Madiinah waqooyiga ka xigtaa saddex boqol laba iyo labaatan kiiloomitir. Markaasuu magaca Waadii Al Quraa wuxuu noqday Waadii Al Culaa."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Al Xijru maray wuu ku degay, dadkuna uu ceelkeeda biyo kasoo dhaansadeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,ku yiri:

لا تشربوا من من مائها شيئا ولا تتوضئوا منه للصلاة وما كان من عجين عجنتموه فاعلفوه الأبل ولا تأكلوا منه شيئا ولا يخرجن أحد منكم الليلة إلا ومعه صاحب له

"Laa tashrabuu min maa'ihaa, walaa tatawadda'uu minhu lilssalaati. Wa maa kaana min cajiinin cajintumuuhu fa aclifuu al ibila, wa laa ta'kuluu minhu shay'an. Wa laa yakhrujanna axadun minkum al llaylata illa wa macahu saaxibun lahu." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Biyeheeda waxba ha ka cabina, salaadna ha uga weyso qaadannina. Cajiintaad biyeheeda ku raqdeenna geela calaf ahaan u siiya, adinkuna waxba ha ka cunina. Caawana axadna yuusan idinka soo bixin isago uu nin kale la socdo mooyee." Markaasuu dadku yeelay wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku amray, intaan ka ahayn laba nin oo Banii Saacidah u dhashay, oo uu midkood xaajo u baxay, kan kalena uu ratigiisa doonay. Midka xaajadiisa u baxay markuu tegeyba waa la ceejiyay. Kan ratigiisa donayayna dabaysha ayaa qaaday oo labada buurood oo Dhayyi' dhigtay. Markaasuu warkaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo sheegay oo u yiri:

ألم انهكم أن يخرج رجل إلا ومعه صاحب له

"Alam anhakum an yakhruja axadukum illaa wa macahu saaxibun?" oo macnihiisu yahay: "Soo idinkama reebin inuu axadkiin baxo inuu nin kale la socdo mooyee?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u duceeyey midka la ceejiyay oo uu bogsooday, kan kalena oo labada buurood oo Dhayyi' lagu tuurayna, qabiilka Dhayyi' ayaa hadiyo ahaan u siisay Rsulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Al Madiinah kusoo laabtay."
Ibnu Hishaam wuxu yiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, Al Xijri maray maradiisuu wajigiisa saaray oo uu ku daboolay, hashiisana u dhaqaajiyay, kaddibna uu yiri:

لا تدخلوا مساكن الذين ظلموا أنفسهم إلا أن تكونوا باكين أن يصيبكم ما أصابهم

"Laa tad-khuluu buyuuta allathiina thalamuu illaa wa antum baakuuna, khawfan an yusiibakum mithlu maa asaabahum."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ha gelina guryaha kuwa dulmiga falay adinkoo ooyaya mooyee, cabsi aad ka qabtaan inay idinku dhacaan wax la mid ah waxa ayaga ku dhacay oo kale."

Naska carabiga ah in yar ayuu ka duwan yahay kan soomaaliga ku qoran, macnuhuse waa isla mid: meeshuu carabigu ka yiri masaakina af soomaaligu wuxuu yiri buyuut, carabiga waxaa ka maqan khawfan oo ah cabsida, soomaaligana waa ku zaaid ah mithlu. Kullina waa isku macne.

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasay waxay waabariisteen ayagoo aan biyo haysan oo ay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ashtakoodeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u duceeyey oo uu Ilaahay Subxaanahu soo diray daruur oo ay roob soo di'isay, oo ay biyo ka dhergeen, biyahay u baahnaayeenna ay weelashooda ku qaateen."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Maxmuud ayaan waxaan ku iri: "munaafaqiinta idinku dhex jiray ma tiqiinneen?" Wuxuu yiri: "haa, a Allaahi, oo ninku wuxuu ku arkayay oo ku aqoonayay wiilkiisa iyo aabihiis iyo adeerkiis iyo cashiiradiisa, markaasay qarin jireen. Rag tolkay ah ayaa waxay ii sheegeen nin munaafaqiinta ka mid ah oo nifaaqiisa la ogaa, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u raaci jiray meeshuu aadaba.

Markaasay markuu amarka dadku ka dhacay Al Xijri waxa dhacay, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam duceeyey oo uu Ilaahay daruur soo diray oo ay biyo keentay, dadkuna ka harraad baxay, ayay waxay ku yiraahdeen: "War hoy is jir! Middaan dabadeed miyaad wax kale dooneysaa?" Wuxuu yiri: "Waxay ahayd daruur meesha iska maraysa!"

Hadalka ibnu Al Llusayt/أبن اللصيت

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuu dariiqa ku jiray ayaa waxaa ka luntay hashiisa, markaasay asxaabtiisu raadiyeen, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la joogo nin asxaabtiisa ka mid ah oo la yiraahdo **عمارة بن جزم** Cumaarah bin Xazm, ahaana nin **العقبة** Al Caqabah iyo **بدر** Badar ka qayb galay, ahna adeerka **بني عمر بن حزم** Banii Camr bin Xazm. Degmadiisana ragga ay wada deggan yihiin waxaa ku jira **زيد بن اللصيت القينقاعي** Zayd bin Al Llusayt Al Qaynuqaacii oo munaafaq ah (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Waa ibnu Lusayb."). Markaasuu Zayd bin Al Llusayt wuxuu yiri isagoo degmada Cumaarah jooga, Cumaarana uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtiisa joogo: "Soo Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma laha inuu Nabi yahay, warka Samadana idiinma sheego, haddana uusan ogayn meeshay hashiisu jirto?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu calayhi Wasallam, ayadoo uu Cumaarh agtiisa joogo wuxuu yiri:

إن رجلا قال هذا محمد يخبركم أنه نبي ويخبركم خبر السماء وهو لا يدري أين ناقته وإني والله لا أعلم الا ما علمني الله وقد دلني الله عليها هي في الوادي قد حبستها شجرة بزمامها فانطلقوا فجاءوا بها

"inna rajulan qaala: "Haathaa Muxammadun yukhbirukum annahu Nabiyyun, wa yazcamu annahu yukhbirukum bi amri Al Ssamaa'i wa huwa la yadrii ayna naaqatahu! Wa innii wa Allaahi maa aclamu illaa maa calamanii Allaahu, wa qad dallanii Allaahu calayhaa, wa hiya fii haathaa al waadii fii shicbi kathaa wa kathaa qad xabasathaa shajaratun bi zimaamihaa. Fa indhaliquu xattaa ta'tuunii bihaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Nin ayaa wuxuu yiri: "Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa kanaa oo wuxuu idin leeyahay inuu Nabi yahay, iyo inuu idiin sheego amarka Samada, mana uusan oga meeshay hashiisu ku sugan tahay." Aniguna wa Allaahi ma ogi wuxuu Ilaahay ii sheego mooyee, wuxuuna ii tilmaamay meeshay hashu joogto. Waxayna joogtaa dooxadaan, banka kaas iyo kaas ah, waxaana xabbisay geed oo hoggaankeeda qabsaday. Hadaba dhaqaaqa oo ii keena." Markaasay tageen oo ay keeneen. Markaasuu Cumaarah bin Xazm degmadiisa kusoo laabtay, uuna yiri: "Wa Allaahi Rasuulka Ilaahay, Sallaa llaahu Calayhi Wasallam, wuxuu haddeer noo sheegay wax yaab leh, kuna saabsan nin wuxuu yiri oo uu Ilaahay u sheegay inuu yiri sidaas iyo sidaas, ahna wuxuu Zayd bin Al Llusayt yiri." Markaasuu nin ka mid ah ragga Cumaarah la degmada ah oo aan Rasuulka Ilahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la joogin markuu sidaas lahaa ayaa wuxuu yiri: "Wa Allaahi Zayd ayaa warkaas yiri intaadan noo imaan." Markaasu Cumaarah intuu Zayd ku jeestay oo uu luqunta ka qanjaruuftay wuxuu yiri: "Addoommada Ilaahayow aniga ii kaalaya, oo waxaa degmadayda ku jira wax xun, aniguna kama war hayo. Ka bax cadawga Ilaahayow degmadayda, aniga i raaci mayside!" Dadka qaarkiis waxay

yiraahdeen inuu Zayd tawbad keenay markaas dabadeed. Qaarna waxay yiraahdeen in la tuhmayay ilaa uu ka dhinto."

Buuraha Madaa'inu Saalex/جبال مدائن صالح

Buuraha Thamuud ay degganaayeen iyo kuwa hareerohoodaba ah, waa buuro aanan ayagoo kale adduunka meel kale ku arag. Waxaabad mooddaa in buur walba gacanta lagu qoray oo si la doonayay loo qoray oo qurux badan. Buurahaas, oo dhul aad u ballaaran ku fidsan ayay degi jireen oo ay guryo ay degaan ka qodan jireen. Waxay kaloo ka qodan jireen qubuurohooda.

Markaan galay guryahaas dhexdooda iyo qubuurahaba waxaad garanaysaa inay jirarkooda la mid ahaayeen jirarka dadka maanta nool, oo qolalku waxay la mid yihiin qolalka maanta, oo in iri waliba waa qolal yaryar marka guryaha maanta qaarkood loo fiiriyo. Sidoo kale qubuuruhu waxay le'egyihiin quburaha maanta. Quburuhuna waa wada dhisan yihiin oo qabri walba waxaa ku wareegsan darbi yar oo dhagax ah.

Buuraha ugu caan san waa kuwaan soo socda, sidaan uga soo dhigay (www.al-ula.com) :

1. **Qasru Al Fariidi/قصر الفريد**: waana magacay dadka beesha degganai u yaqaannaan, looguna bixiyay inay tahay buur wayn oo keligeed meel taagan oo inta kale ka soocan.
2. **Qasru Al Binti/قصر البنت** : waana magacay dadka beesha degganai u yaqaannaan, looguna bixiyay inay tahay, wuxuuna ku yaallaa meesha la yiraahdo Al Khuraymaat. Waxaa halkaas ku wehilya tiro badan oo qubuuro ah.
3. **Qasru Al Cajuuzi/قصر العجوز**: waana magacay dadka beesha degganai u yaqaannaan, wuxuuna ka kooban yahay buur keligeed ah oo wayn oo ciidda dhexdeeda ku taalla oo wajigeedu u egyahay midka Diiwaanka.
4. **Al Ddiiwaanu/الديوان**: waana golaha uu boqorku fariisto oo ay dawladdu go'aankeeda ku gaarto…dhererkeedu waa laba iyo toban mitir iyo sideetan. Ballaceeduna waa sagaal mitir. Korna waxay u dheer tahay sideed mitir. (Diiwaankaan ayayna ku shireen sagaalka mujrim kuna heshiiyeen inay hasha dilaan, kaddib markay halkaas khamro ku cabbeen)
5. **Maxlabu Al Naaqah/محلب الناقة**: waa barta hasha lagu maali jirey, waana barkad dhagax ka sameysan, laguna maali jiray hasha sayyidunaa Saalex.
6. **Maqaabiru Al Usuudi/مقابر الأسود**: qubuuraha libaaxda, looguna bixiyay magacaan ayadoo halkaas ay qubuuraha ku yaalliin xoolo libaax u eg.
7. **Jabalu Cakmah/جبل عكمة**, ayna dushiisa ku yaallin macbadyo qadiim ah.
8. **Al Maabiyaat/المابيات**, ahna degmooyin qadiim ah oo taariikhda ka horreeyey.
9. **Al Mazxam/المزحم**: barta lagu ciriiriyay, waana marriin ciriiri ah oo la sheegay inay tahay barta hasha lagu faylo gooyey oo lagu dilay.
10. **Al Xawaarah/الحوارة**: xawaar waxaa afka carabiga lagu yiraahdaa nirigta: waana buur wayn oo sulub ah oo ay hasha Saalex kasoo baxday, ayadana ay ku carartay nirigtu marka hooyadeed la dilay. (buurtaan cabbirradeedu waa sidatan: dhererkeedu waa kun iyo shan boqol oo mitir. Ballaceedu waa todsdoba boqol oo mitir. Taggeeda korena waa kun mitir)
11. **Al baldatu al qadiimah/البلدة القديمة** ee ku taalla Al Culaa.

12. **Al Khuraybah/الخريبة** oo Al Culaa xagga bari ka xigta, ayna ku yaalliin qubuuro badan iyo nuquush iyo barkad dhagax ka samaysan oo dadka beeshu ku magacaabaan "maxlabu al nnaaqah" oo ah "barta hasha lagu maalo."

Masaaxada dhulkay buurahaan intooda badani ku fadhiyaaan waa saddex iyo toban kiiloomitir iyo sagaal iyo soddon. Waa intaas warkaas websitkaas (www.al-ula.com) kasoo qaadannay. In badan oo warkaas la mid ahna wuxuu ku dhigan yahay manshuuraadka dawladda oo aan matxafka kasoo qaatay.

Buurahaan intooda badani waxay ku dhex jiraan inta la yiraahdo "inta xaaraanta ah" waxaana ku wareegsan silig, waxayna leedahay albaab laga galo oo waraaqaha aqoonsiga, ama baasaboorka iyo ruqsada oggolaashada lagu weydiinayo. Haddaadan sucuudi ahayn waxaad u baahan tahay si aad ku gashid inaad sidatid visa "ziyaaro" ah, oo visada xajka ama cumrada kuma tegi kartid. Waxaa intaas dheer oo aad u baahan tahay waxa la yiraahdo "tasriix" oo ah oggolaasho inaad geli kartid oo dawladda laga soo qaato intaadan bartaas imaanba.

Ibnu Kathiir/إبن كثير

Ibnu Kathiir wuxuu yiri:

"Al Xijri waxaa ku taalla buur la yiraahdo **الكاتبة** "Al Kaatibah" (oo ah midda wax dhigta, ahna gacanta). Saxiixana waxaa ku dhigan inuu ibnu Cumar yiri inay dadku ku degeen ayagoo la socda Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Xijriga arliga Thamuud, markaasaa biyo la waraabo dooneen. Reer Thamuud waxay ahaayeen kuwa Saalex wediistay inuu Aayad ula yimaado, waxayna usoo jeediyeen in looga soo saaro buur sulub ah oo ay ayaga laftoodu tilmaameen, ahna buur inta kale ka go'an oo keligeed meel ku taalla Al Xijri dhexdiisa oo la yiraahdo "Al Kaatibah", markaasay weydiisteen inuu uga soo saaro hal toban bilood xaamilo ah oo ay fooshu hayso. Markaasuu wuxuu ka guntay ballan iyo heshiis in hadduu Ilaahay waxaas ay weydiisteen siiyo inay isaga rumaynayaan, ayna raacayaan. Markay heshiiskaas iyo ballankaas siiyeen, ayuu Saalex salaad u istaagay oo uu Ilaahay Cazza wa Jalla baryay. Markaasay buurtaasu gilgilatay oo ay dildillaacday ayna kasoo baxda hal xaamilo ah oo uu cunuggeedo caloosheeda ku dhex dhaqaaqayo, ahna siday u weydiisteen." Waa intaas warkiisu.

تعليمات الزيارة
INSTRUCTION FOR THE VISITORS
11/26/2011

11/26/2011

11/26/2011

Ceelka Nabi Saalix Calayhissalaamu. Xasanwali 1433H/2011M..

Ninkaanu wuxuu dhex taagan yahay “Al Diiwaanu” oo ah golahay dawladda Thamuud ku shiri jirta, madaxiisuna saqafka ayuu u dhow yahay, taasoo ku tusaysaa inay reer Thamuud dhererka raga maanta jira oo kale lahaayeen. Xasanwali 1433H/2011M..

Ceelka Saalex ee Al Xijru. Xasanwali 1433H/2011M.

Al Diiwaanu, Golaha shirka boqorka Al Xijru iyo meeshay ku shireen sagaalka mujrim kuna go’aansadeen inay hasha dilaan. Xasanwali 1433H/2011M.

Qasru Al Fariidi ee Al Xijru. Xasanwali 1433H/2011M.

المزحم :-

:: الناقة وهو عبارة عن ممرتروي الأساطير أنه المكان الذي عقرت فيه الديوان جبل أثلب بجوار:

Al Mazxam/**المزحم**: waa labadaan buurood dhexdooda waana barta la sheegay in lagu dilay hasha Nabi Saalex. Dariiqa dhex maraa wuxuu ka yimaadaa Tabuuk oo dhanka kore ah wuxuuna u socdaa Al Madiinah Al Munawwarah. Waxaan kasoo qaatay website, aniga laftayduna dariiqaan ayaan soo maray waase ka gaari waayay inaan masawiro.
Xasanwali 1433H/2011M.

جبل الحوار

Buurtaan waa Jabalu Al Xawaar, ayaduuna Ilaahay hasha kasoo saaray. Inteeda madow oo korreysa waxay u egtahay hal fadhida. Xasanwali 1433H/2011M. waxaan kasoo qaatay websityaha ku dhigan.

الناقة وهذا الشق يقال له جبل الحوار حيث يعتقد ان الحوار (ابن الناقة) فر اليه بعد عقر

(الاعلى (قوقل ايرث جبل الحوار من

محلب النــآقه ..ْ

حوض كبير يقال أن ناقة صالح عليه السلام تحلب لبناً يشربه وبها محلب الناقة وهو عبارة عن اليوم كما ورد في القرآن الكريم الناس وتشرب الماء في ذلك
لكم شرب ولها شرب يوم معلوم "

Maxlabu Al Naaqah: barta hasha lagu maali jiray. Waxaan kasoo qaatay website. Xasanwali 1433H/2011M.



Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Sidaasuu kitaabku noogu dhammaaday, waxaanna ku gunaanadeynnaa annago leh:

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Makkah Al Mukarramah
Arbaco laba iyo tobanka Muxarram kun afar boqol saddex iyo soddon Hijriga, una dhiganta toddobada Disembar laba kun kow iyo toban Miilaadiga.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee

Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.